جمهورية مصر العربية
وزارة الأوقاف

24 رجب 1443هـ
25 فبراير 2022م

(1)

# Israha iyo micraajka iyo waajibinta salaadda

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{وَأَقِيمُوا الصَّلاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَارْكَعُوا مَعَ الرَّاكِعِينَ}،**

**(Ooga salaada, hixiyana sakada, lana rukuuca kuwa rukuuca)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Socdaalka israha iyo micraajka waxaa ku sugnayd deeq ilaahi ah, iyo siismo rabbaani ah oo uu Alle (caza wa jalla) ku gaaryeelay umaddan, waxaana ugu weyn faradyeelidda salaadda, haddiyadaas rabbaaniga oo ku xiraysa addoomaha rabbigooda (caza wa jalla), wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(ففَرض عليَّ خمسين صلاةً في كلِّ يومٍ وليلةٍ، فنزلتُ إلى موسى (عليه السلام)، فقال: ما فرض ربُّك على أُمَّتِك؟ قلتُ: خمسين صلاةً، قال: ارْجِعْ إلى ربِّك فسَلْه التَّخفيفَ، فإنَّ أُمَّتَك لا تُطيقُ ذلك... فقلتُ: يا ربِّ خَفِّفْ عن أُمَّتي)، فلم يزل نبينا (صلى الله عليه وسلم) يراجع ربه (عز وجل) حتى قال له ربه سبحانه: (إنـهنَّ خمسُ صلواتٍ كلَّ يومٍ وليلةٍ لكلِّ صلاةٍ عشرٌ ، فَذَلِكَ خَمْسُونَ صَلَاةً).**

**(Wuxuu igu faradyeelay konton salaadood habeen iyo maalin kaste, waxaan usoo degay Muuse (nabagdalyo**

**korkiisa ha ahaatee) wuxuu yiri: muxuu ku faradyeelay rabbigaaga ummadaada? Waxaan ku iri: konton salaadood, wuxuu igu yiri: u noqo rabbigaaga oo weyddiiso fududeyn, ee umaddaada ma karto arrintaas… waxaan iri: rabbiyow ka khafiifi umaddayda) nabigiina wuxuu ku sii noqnoqonayay rabbigiisa (cazza wa jalla) ilaa uu ka yiraahdo rabbigiisa (SW): (iyaga waa shan salaadood habeen iyo maalin kaste salaad kastana toban ayay leedahay, taasna waa konton).**

Salaadda in lagasoo waajibiyo habeenka micraajka meel ka korraysa samadaha toddobada ah waxay daliil u tahay qiimaha ay leedahay iyo meesha ay joogto, salaaddu waa farxad, sidoo kale waa nolosha quluubta iyo raaxada ruuxda, waana micraaj iimaani ah oo dadka ay ugu dhowaanayaan rabbiga caalamka, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah:

**{وَاسْجُدْ وَاقْتَرِبْ}،**

**(sujuud oo u dhowoow)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(عَلَيْكَ بِكَثْرَةِ السُّجُودِ، فَإِنَّكَ لا تَسْجُدُ للهِ سَجْدَةً إلا رَفَعَك اللهُ بِهَا دَرَجةً، وَحطَّ بِهَا عَنْكَ خَطِيئَةً).**

**(Waa inaad badidisaa sujuudda, sujuudda ood u sujuuddo Alle darajo ayuu kugu siinayaa gafna waa kaaga tirtirayaa)**

Sidoo kale in lagu waajibiyo salaadda socdaalka micraajka waa farxadgalin nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) u sugan, markay qabsadeen dhibaatooyin daran sanadkaas oo lagu magacaabay sanadka murugta; taas waxay tilmaamaysaa salaadda inay qalbiga dejiso, laabtana farxadgaliso, ishana qaboojiso, waana gargaar ka timid xagga Alle (cazza wa jalla) waqtiga dhibaatada, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَلَقْد نَعْلَمُ أَنَّكَ يَضِيقُ صَدْرُكَ بِمَا يَقُولُونَ* فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَكُنْ مِنَ السَّاجِدِينَ * وَاعْبُدْ رَبَّكَ حَتَّى يَأْتِيَكَ اليَقِينُ}**

**(Waxaana ognahay Laabtaadu inay ka cidhiidhyami waxay sheegi (oo xun) * ee ku Tasbiixso mahadda Eebahaa ahawna kuwa Sujuuda * Caabudna Eebahaa intay Yaqiintu kaaga timaaddo (Geeridu)**), wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَاسْتَعِينُوا بِالصَّبْرِ وَالصَّلَاةِ}،**

**(Kaalmaysta sabarka iyo salaadda)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(وجُعِلَت قُرَّةُ عَينِي في الصَّلاةِ)**

**(farxaddayda salaaddaa la dhex yeelay)**, wuxuu ku dhihi jiray nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) sayidkeena Bilaal (Alle raalli haka noqdee):

**(يَا بِلالُ، أَقِمِ الصَّلاةَ، أَرِحْنا بها)**

**(Bilaalow salaadda aqin oo noogu raaxeey)**

Caddeyn ayaa ku sugan fududeynta Alle (cazza wa jalla ) uu ka fududeeyay salaadda umadda muxamaddiyada waxayna caddeynaysaa dhammaystirnaanta naxariistiisa (SW) uu u naxariisanayo khalqigiisa, waxayna tusinaysaa shareecada fudeydka ay wadato, iyo qaadidda dhibka iyo rafaadka, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{لاَ يُكَلِّفُ اللهُ نَفْسًا إِلاَّ وُسْعَهَا}،**

**(Alle kuma kalifo naf waxayna karin)**, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلاَ يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ}،**

**(Wuxuu idinla doonayaa Alle fudayd ee idin lama doonayo culays)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ الدِّينَ يُسْرٌ)،**

**(Diinta waa fudeyd)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ اللهَ لَمْ يَبْعَثْنِي مُعَنِّتًا ولا مُتَعَنِّتًا، وَلَكِنْ بَعَثَنِي مُعَلِّمًا مُيَسِّرًا) .**

**(Ilaahay ima soo dirin anoo ad'adkaynaya ama is ad'adkaynaya laakin wuxuu isoo diray anoo macallin ah oona fududeynaya)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay nebiyada iyo rasuullada, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa

Shaki kama taagna salaadda inay tahay faq ka dhexeeya addoonka iyo khaaliqiisa (SW), wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(قَالَ اللهُ تَعَالَى: قَسَمْتُ الصَّلاَةَ بَيْنِي وَبَيْنَ عَبْدِي نِصْفَيْنِ، وَلِعَبْدِي مَا سَأَلَ، فَإِذَا قَالَ الْعَبْدُ: {**الْحَمْدُ للهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ**}، قَالَ اللهُ تَعَالَى: حَمِدَنِي عَبْدِي، وَإِذَا قَالَ: {**الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ**}، قَالَ اللهُ تَعَالَى: أَثْنَى عَلَيَّ عَبْدِي، وَإِذَا قَالَ: {**مَالِكِ يَوْمِ الدِّينِ**}، قَالَ: مَجَّدَنِي عَبْدِي، فَإِذَا قَالَ: {**إِيَّاكَ نَعْبُدُ وَإِيَّاكَ نَسْتَعِينُ**}، قَالَ: هَذَا بَيْنِي وَبَيْنَ عَبْدِي، وَلِعَبْدِي مَا سَأَلَ، فَإِذَا قَالَ: {**اهْدِنَا الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِيمَ صِرَاطَ الَّذِينَ أَنْعَمْتَ عَلَيْهِمْ غَيْرِ الْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ وَلاَ الضَّالِّينَ**}، قَالَ: هَذَا لِعَبْدِي وَلِعَبْدِي مَا سَأَلَ).

(Wuxuu yiri Allaha sarreeya: salaadda waxaan u qaybiyay labo qeyb aniga iyo addoonkayga naga dhexeeya, addoonkaygana waxaa u sugnaaday wuxuu weyddiiyo, markuu dhaho : (**Mahad oo dhan waxaa iska leh Ilaahay, oo ah rabbiga uumanka**), Allaha sarreeya wuxuu dhahaa: addoonkayga waa igu mahdiyay, markuu dhaho (**Naxariis guud iyo mid gaarba leh**), Allaha sarreeya wuxuu dhahaa

addoonkayga wuu i ammaanay, markuu dhaho (**Boqorka Maalinta abaalmarinta**), wuxuu dhahaa: addoonkayga wuu i weyneeyay, markuu dhaho : (**Adiga uun baan ku caabudaynaa, adiga uun baanna ku kaalmaysanaynaa**) tan aniga iyo addoonkayga ayay naga dhexaysaa, waxaa u sugnaaday addoonkayga wuxuu weyddiisto, markuu dhaho: (**Ee nagu hanuuni jidka toosan Jidka kuwa aad u nicmaysay, aan ahayn kuwa aad u carootay, iyo kuwa dhunsanba**) wuxuu yiri tan addoonkaygaa iska leh waxaana u sugnaaday wuxuu weyddiisto).

Sidoo kale salaadda waxay ku leedahay saameys daran ah hagaajinta nafta, iyo toosinta dhaqanka, iyo qaadashada akhlaaqda wanaagsan, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{وأقم الصلاة إِنَّ الصَّلَاةَ تَنْهَى عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ}**

**(Salaaddana oog maxaayeelay salaaddu waxay reebta xumaanta iyo waxa la noco)**, qofka si xaq u tukanaya suurtagal ma aha inuu noqdo beenaale iyo qof qish ku dhaqma, iyo qof khiyaano badan ama dhagar badan ama ballankabax badan, balse waa akhlaaq iyo qiyam dhulka ku socda oona waafaqsan manhajka Alle iyo shareecadiisa.

**Ilaahayow naga dhig annaga iyo ubadkeena kuwa salaadda ooga rabiyow naga aqbal ducada**